# Su'aalaha Ugu badan ee ku Saabsan Sidii Caruurta looga Ilaalin lahaa Jadeecada

## SU'AALAHA KU SAABSAN JADEECADA

### Jadeecadu ma la xanuunsan kartaa?

Haa. Jadeecadu waxay noqon kartaa mid khtar badan waxayna keeni kartaa xaalado culus, oo kamid tahay geeridu. Tusaale ahaan, 1 kamid ah 5-tii canug ee aan la talaalin ee ay jadeecadu ku dhacdo ayaa u baahanaya in isbitaal la geeyo, 1 kamid ah 20-kii ayaa qaadi kara oof-wareen, 1 kamid ah 1000-kii ayaana qaadi kara xaalad nolosha halis ku ah oo maskaxdu bararayso.

### Waa maxay astaamaha jadeecadu?

Astaamaha jadeecadu waxay inta badan soo ifbaxaan 7 ilaa 14 maalmood kaddib markii qofku khatar u galo. Astaamaha guud waxaa kamid ah qandho badan, qufac, sanka oo duuf ka socdo, finan, iyo indhaha oo guduuta, oo illin ka socoto. Finanka jadeecadu waxay inta badan ku bilowdaan dhowr maalmood kaddib markii qandhadu bilaabato waxayna marka koowaad kasoo baxaan wajiga kaddibna waxay ku faafaan qaybaha hoose ee jirka.

### Haddii qofka ay jadeeco ku dhacdo, ma heli karaa daawo?

Ma jiraan daawooyin ama la tacaalis u gaar ah jadeecada. Daryeelka caafimaadka waxaa diiradda lagu saarayaa yaraynta astaamaha iyo daryeel caawin ah. Qaabka ugu wanaagsan ee aad cannugaaga uga badbaadin karto jadeecadu waa inaad hubiso inuu qaato talaalka MMR (jadeecada, qaamo-qashiirka, rubella).

### Maxaan sameeyaa haddii aan u maleeyo in canugaygu khatar u galay jadeecada?

Waxaa laga yaabaa in ay kusoo wacdo waaxda caafimaadka oo kuu sheegaysa in canugaaga laga yaabo inuu khatar u galay jadeecada. Raac tilmaamaha waaxda caafimaadka. Haddii canugaagu bilaabo inuu yeesho astaamaha jadeecada, wac dhakhtarkiisa ama isbitaalka isla markiiba si ay kuugu sheegaan waxa xiga ee aad samaynayso. Wac intaadan tagin si aad u hubiso inay u diyaar garoobaan sidii booqashadaadu u noqon lahyad mid amaan ah.

## SU'AALAHA KU SAABSAN TALAALKA MMR

### Talaalka MMR ma yahay mid amaan ah? Sidee ayaan ku ogaanaynaa?

Haa. Malaayiin caruur ah ayaa si nabadgalyo ah u qaatay talaalka MMR ilaa iyo intii la ogolaaday in ka badan 50 sanno ka hor. Centers for Disease Control and Prevention (CDC, Xarumaha Kahortagga iyo Xakamaynta Cudurada) iyo Food and Drug Administration (FDA, Maamulka Cuntada iyo Daawada) waxay isticmaalaan nidaamyo badan oo amaanka khuseeya si ay si joogto ah ugula socdaan una xaqiijiyaan in talaaladu yihiin kuwo ammaan ah. MMR waxaa sidoo kale laga tijaabiyay nabadgalyadeeda caalamka oo dhan.

### Waa maxay saamaynada xun ama khataraha talaalka MMR?

Kaddib markii uu talaalka MMR qaato, canugaagu wuxuu la kulmi karaa saamayn aan wanaagsanayn, sida xanuun meesha laga duray ah, qandho, ama finan. Kuwaani waxay inta badan jiraan dhowr maalmood ayagaana iska baaba'a. Saamaynada aan wanaagsanayn ee xun waa kuwo dhif iyo naadir ah, laakiin waxaa kamid noqon kara qandho badan oo sababi karta qalal. Qalalka si guud looma arko inuu sababayo waxyeelo waaraysa ama uu leeyahay saamayn muddo dheer jiraysa.

### Majiraan khataro muddo dheer ah oo talaalka MMR ka danbeeya?

Waxaan leenahay khibrad talaalka MMR ah oo tobonaan sanno ah mana jirto caddayn muujinaysa inuu khatrat waarta leeyahay.

### Talaallada sida MMR ma keenaan ootisim?

Waxaa la sameeyay cilmibaaris qoto-dheer oo ay ku luglahaayeen boqolaal kun oo caruur ah taasoo muujinaysa inuusan jirin xiriir ka dhexeeya talaalka iyo ootisimka.

**WAX BADAN KA OGOW TALAALADA CARUURTA:**

**Su'aalo ma qabtaa? Waxyaabaha ku saabsan Jadeecada**

**cdc.gov/measles/about/questions.html**

**Waxyaabaha ku saabsan Talaalada loogu talagalay Caruurtaada**

**cdc.gov/vaccines-children/about/index.html**

## Ilaa heerkee ayay gaarsiisantahay shaqada talaalada MMR?

Talaalka MMR si aad u wanaagsan ayuu u shaqeeyaa. Laba kuuro kaddib, wuxuu 97% dadka difaacayaa jadeecada. Waa dhif iyo naadir in dadka talaalka qaatay ay jadeeco ku dhacdo, laakiin waa ay ku dhici kartaa. Si kastaba ha ahaatee, waxay u badan tahay inay cudurka u gudbiyaan dadka kale si ka yar. Waxay sidoo kale inta badan la kulmaan xanuun yar iyo xaalado culus oo yar.

## Haddii aanan canugayga talaalin, ma dhabaa inuu khatar ugu jiro in jadeeco ku dhacdo?

Jadeecadu waxay u faaftaa si fudud waana mid kamid ah cudurada ugu faafidda og dunida. Qof walba oo aan haysan difaaca jadeecada ayaa khatar ugu jira. Maadaama ay jiraan safaro badan iyo hoos u dhac ku yimid heerka qaadashada talaalka, waxaan aragnay in kiisaska jadeecadu kor u kaceen, taasoo talaalka MMR ka dhigaysa mid sidii hore kasii muhiimsan.

## Qoyskeenu wuxuu qorshaynayaa safar dibadda ah. Sidee canugeena uga ilaalin karnaa jadeecada?

Safarka dibadda ah kahor, qof walba oo qoyskiina kamid ah waa inuu qaataa difaaca jadeecada asagoo qaadanaya talaalka MMR sababtoo ah jadeecadu waxay ka dilaacdaa dunida oo dhan. Talooyinka waxaa kamid ah kuurada MMR ee loogu talagalay caruurta da'doodu tahay 6–11 bilood iyo laba kuuro (oo ay 28 maalmood u dhexayso) oo loogu talagalay caruurta da'doodu tahay 12 bilood iyo kasii weyn, dhowr iyo toban jirada, iyo dadka waaweyn ee aan horey u talaalnayn. Inaad is talaasho 2 todobaad kahor intaadan safrin ayaa ku siinaysa difaaca ugu wanaagsan ee jadeecada.

## Caruurtu ma leeyihiin difaaca jadeecada markay dhashaan?

Markii ilmaha ay dhasho hooyo leh difaaca jadeecada, wuxuu difaac ka helayaa antibody-yada hooyada: Difaacaanu wuxuu caawinayaa bilaha ugu horeeya noloshiisa laakiin marba markii kasii danbaysa wuu sii daciifayaa. Talaalada, sida talaalka MMR, ayaa ah qaabka ammaanka ah ee canugaaga ka caawin karta inuu dhisto difaaca asagoon khatar u galin inuu qaado jadeecada.

## Maxay tahay sababta ilmuhu ugu baahanyihiin inay qaataan talaalka MMR marka ay aadka u yaryihiin?

Talalaada waxaa lagu talinayaa in la qaato bilowga nolosha si ay uga caawiyaan in ilmaha iyo caruurta laga difaaco kahor intaysan wajihin cuduro halis ah, sida jadeecada. Caruurtu waxay si qorshaysan u qaataan talaalkooda MMR ee koowaad markay 12–15 bilood jiraan sababtoo ah marka difaaca ay ka heleen antibody-yada hooyadu ka dhamaanayo. Markay da'daas jiraan, caruurta ay jadeecadu ku dhacdo waxaa ku imaanaysa suurtagalnimo saraysa oo ah inay xanuuno culus qaadaan.

## Jirka caruurta ma ka tanbadan karaan talaalada faraha badan uu iskumarka qaadanayo?

Maya, caruurta caafimaadka qabta waxay maalin walba la dagaalamaan kumanaan jeermisyo ah. Talaaladu waxay isticmaalaan antigen-no, kuwaasoo qayb ka ah jeermisyada sababaya in difaaca jirku dhisto antibody-yo lagula dagaalamo cudurka. Xaataa haddi ilmuhu qaataan talaalo badan hal maalin gudaheed, talaalada waxaa kujira cadad yar oo ah antigen-nada caruurtu bii'adooda kala kulanto maalin walba.

## Canugaygu hadda ayuu xanuunsanyahay. Ma caadi baa inuu qaato talaalka maantaba?

Iisheeg xanuunka canugaaga haya. Goorma ayuu ku bilowday waa se maxay astaamihiisu? Sida caadiga ah, caruurta waa la talaali karaa xaataa haddii ay qabaan xanuun fudud sida hargabka, dhago xanuun, qandho yar, ama shuban. Xasuusnow inaysan jirin faa'iido caafimaad oo ku saabsan sugitaanka talaalista canugaaga haddii uu qabo xanuun fudud. Waa muhiim in caruurtu talaalkooda qaataan wakhtigii loogu talagalay si looga difaaco cudurada halista ah.

### WAX BADAN KA OGOW TALAALADA CARUURTA:

**Su'aalo ma qabtaa? Waxyaabaha ku saabsan Jadeecada**

cdc.gov/measles/about/questions.html

**Waxyaabaha ku saabsan Talaalada loogu talagalay Caruurtaada**

cdc.gov/vaccines-children/about/index.html